# Khayraad Tamar oo BILAASH AH*



Miyey biilashaada tamarta adag tahay in la maareeyo?
Ma doonaysaa inaad yarayso kharashaadkaaga tamarta?
Qaad tallaabooyinkaan soo socda.

**1**

## Dalbo Barnaamijka Kaalmada Tamarta Degmooyinka Ramsey & Washington

Barnaamijka Kaalmada Tamarta wuxuu ka caawiyaa qoysaska dakhliga u-qalma inay joogteeyaan tamar guri raqiis iyo joogto ah. Adeegyada waxaa kamid ah kaalmada bixinta lacagta biilka iyo faragelinta mushkiladda tamarta. Waxaad sidoo kale heli doontaa gudbin ku socota barnaamijka kaalmada cimilaynta. Dadka guryaha leh iyo kuwa kireystayaasha ah labaduba way u-qalmaan.

Wac Jaaliyada Waxqabadka Bulshada ee Degmooyinka Ramsey & Washington **651-645-6470** ama booqo **caprw.org**.

**2**

## Ka qabso ballan booqasho Home Energy Squad®

Home Energy Squad® waxay kugu caawinaysaa inaad wax ka ogaato fursadaha keydinta tamarta ee gurigaaga waxayna rakibtaa agabyo isla goobta. Waxay cusboonaysiin karaan albaabada qabyada ah, heerkulbeeggii hore, laambadaha layrka aan waxtarka lahayn, iyo in ka badan.

Qiimayn bilaash ah ayey heli karaan qoysaska dakhli ahaan u-qalma. Waxay sidoo kale go'aamin doonaan haddii aad u qalanto adeegyada keydinta tamarta oo bilaashka ah adigoo u maraya Barnaamijka Keydinta Tamarta Guriga ee Xcel Energy, oo ay ku jiraan baddalidda qalabka korontada ku shaqeeya, dahaarid iyo foornooyin bilaash ah. Dadka guryaha leh iyo kuwa kireystayaasha ah labaduba way u-qalmaan.

Hadda iska diiwaangali **xcelenergy.com/HomeEnergySquad** ama wac **651-328-6220**.

**Qoysaska waxa waajib ku ah inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga ee uu barnaamijku leeyahay si ay u mutaystaan. La xiriir bixiyaha adeegga si aad u ogaato haddii aad u qalanto.*

ROSEVILLE

Xcel Energy®
PARTNERS IN ENERGY
An Xcel Energy Community Collaboration

**ROSEVILLE IYO XCEL ENERGY WAXAY KU FARAXSAN YIHIIN INAY ISLA SHAQEEYAAN SI LOO GAARO YOOLALKA TAMARTA EE BULSHADEENA.**